



**Waxaad ambaqaadaysaa Earth Day Action Quest si loogu dabaaldago Maalinka Dhulka (Earth Day).** Maalinka Dhulka (Earth Day) waa maalin loogu tala galay in bulshada caalamku iskuugu timaaddo meeraheenna aan wadaagno – si wadajir ah, dunida weynu badali karna! Howlaha aad halkaan ka heli doonto waxay kaa caawin doonaan in aad yarayso saamaynta aad ku leedahay Dhulka waxayna kuu noqon karaan lexejlo fiican oo dhanka ilaha ah. Dhammaystir ugu yaraan ilaa saddex howlood si laguugu daro bakhtiyaa nasiib lagu helayo \$25 Kaarka Hadiyadda Visa ah\*. Mallinta ugu danbaysa Earth Day Action Quest waa Abriil 30keeda. Isku dayo wanaagsan!

Yaree

### □ Dabagalka Qashinka

La soco wax kasta oo aad weelka qashinka ku riddo maantay. Hadhow kama danbaysta, eeg waxa aad tuurtay. Majireen dariiqyo kuu banaanaa oo aad samayn kartay si aad u yarayso caddadka aad tuurtay? Yaraynta qashinku waxay muhiim u tahay abuurista mustaqbal waara. Isku day talaabooyinkaan fudfudud si aad u yarayso qashinkaaga!

**Shukumaanada waraaqda ah:** Isdul saar dharka dhammaaday ee la mayri karo si aad u isticmaasho taa badalkeeda – jarjarista funaanadihii hore ayaa ku wanaagsan.

**Jarjar boorsooyinka iyo qalabka wax lagu seejalo:** Iibsashada boorsooyinka gaarka ah ama qaybaha? In wax badan la iibsado ayaa dhaqaalo ahaan wanaagsan soona saaraysa seejalid yar. U samee adeegsigaaga weelal mar labaad la isticmaali karo.

Boorsooyinka buskutka ee caagga ah iyo waxa lagu daboolo: Ka fakar weel mar labaad la isticmaali karo.

**Miraha kafeega:** Miraha kafeega ee halka mar la isticmaalo ayaa ku haboon laakiin waa kuwo khasaaro badan. Taa badalkeeda, isku day miraha mar labaad la isticmaali karo iyo kafeega badan.

### □ Cuntada: Aad u Wanaagsan oo aan la khasaarin karin

Baro qaabka cuntada loo kaydado si ay wakhti badan kuugu taalo. Maadaama ay yihiin beeraey haybad leh, dadka ree Minnesota waxay yaqaanaan shaqada adag iyo ilaha ku baha soosaarista cuntada. Taasi waa sababta aan u doonayno in aan xaqiijino in cuntada la cuno oo aan la khasaarin! Marka aan cuntada tuurno, waxaan khasaarinnaynaa lacag iyo dhammaan khayraadkii aan ku soo saarnay cuntadaas, raro oo cuntadaas ka dhigo mid diyaarsan. **Halkaan riix si aad u hesho xeeladaha loogu tala galay kaydinta cuntada.**

### □ Muuji Mahadnaq

Kaga mahadceli maqaaxida aad jeceshahay shaqadeeda nadiifka ah, sida in ay ku siisay cuntooyin mar labaad la isticmaali karo ama isticmaalka maadooyin waara. Mahadcelinaanu waxay noqon kartaa mid fool-kafool ah ama dib u eegis onleen ah.

Dib u isticmaal

### □ Dayactir

Badalkii aad tuuri lahayd agabyada burburay, ku xujee naftaada in aad hagaajiso taa badalkeeda. Waxaad baaqsan doontaa lacag waxaadna dareemi doontaa in aad shaqo qabatay. Ku biir mutadawiciinta Goobta Caafimaadka Fix-ii ee ismaamulada **Ramsey** iyo **Washington** ayaka oo soo bandhigaya dayactir iyo hagaajin fudud maalin walba taasoo lagu samaynayo agabyada kujira taxaneyaasha muuqaalkeena dayactirka. Ma aadan helin wixii aad u baahnayd miyaa? Ka fiiri **ifixit.com** iyo **youtube.com** wixii muuqaalo wax lagu baranayo oo dheeraad ah kuwaas oo ku saabsan sida loo dayactiro agabyada inta badan la isticmaalo!

### □ Dib u isticmaalka Waxsoosaarka

Ma ogtahay in labada ismaamulba leeyihiin goobo aad ka heli karto waxsoosaaro bilaash ah sida riinjiyada, midabada, dareereyaasha mashiinada, nadiifiyayaasha agabka guriga? Marka dadku ay agabyadaan keenaan goobaha lagu rido qashinka guriga ee khatarta badan, waxsoosaarada wanaagsan waxaa si bilaash ah lagu siiyaa dadka deegaanka. Kaalay oo furo iskafaalaha oo arag waxa aad hesho! Macluumaadka ku saabsan Xarunta Dib u isticmaalka Waxsoosaarka Ismaamulka Ramsey waxaa laga heli karaa **halkaan**, macluumaadka ku saabsan Qolka Waxsoosaarka Bilaashka ah ee Ismaamulka Washington waxaa laga heli karaa **halkaan**.

### □ Isku Aaddi

Dib u soo samee kaliya agabyada ay shirkadda qashinku aqbalayso. Marka dadku ay agabyo ku ridaan kaaryoonahooda dib usoo saarista waxyaabaha la isticmaalay ama qalabka lagu rido oo aan halkaas loogu tala galin, waxay dhibaato u keenaysaa shaqaalaha goobta dib usoo saarista agabyada la isticmaalay. Tijaabi aqoontaada adiga oo cayaaraya **Cayaarta Baro Waxa La Tuuro!** Ogsoonow: Qaar kamid ah shirkadaha qashinku waxay aqbalaan agabyo gaar ah. Ka xaqiiji shirkadda qashinka macluumaadka ku saabsan waxa ay yihiin agabyada gali kara/aan gali karin weelkaaga qashinka.

### □ Noqo Halyayga Batariga!

Batariyadu waxay sababi karaan dab marka ay ku danbeeyaan qashinka ama dib usoo celinta. Keen goobta aruurinta **sannadka oo dhan ee Ismaamulka Ramsey** ama **Washington County Environmental Center** ama goob kale oo **Call2Recycle** ah.

### □ Goobta Dib usoo kabashada Agabka

MRF waxay u taagan tahay “materials recovery facility” (“goobta Dib usoo kabashada Agabka”), taasoo ah halka weelkaaga qashinku aado si loogu diyaariyo in dib usoo saaris lagu sameeyo. Fiiri waxa ka dhaca Shakopee’s **Dem-Con MRF** una diyaar garow wax kaa yaabiya.

### □ Ku deeq

Ku deeq wakhtigaaga, xirfadahaaga, agabyada inta badan la isticmaalo, cuntada iyo kasii badanba. Ugu deeqidda iyo ka iibsiga bakhaarada thrift waa mid kamid ah qaababka ugu wanaagsan oo lagu yarayn karo isticmaalka. Ku deeqidda wakhtigaaga adiga oo ku tabarucaya iskafaalaha cuntada ama nadiifinaya goobaha dabiiciga ah ee kuu dhow waa qaabab wanaagsan oo aad ku taageeri karto bulshadaada aadna ku ilaalin karto deegaankaaga aad degen tahay.

### □ Qashinka Khatarta ah ee Guriga

Ku asturidda qashinka guriga ee khattarta ah (HHW) goob lagu dajiyo oo kuu dhow. HHW waxaa kamid ah agabyada sida nadiifiyayaasha guriga, riinjiga, waxyaabaha riinjiga lagu daro, batariyada, saliidda matoorada iyo sunta cayayaanka. Marka aan si sax ah loo asturin, HHW waxay khattar ku noqon karaan caafimaadka bili’aadanka iyo kan deegaanka. Gudaha Ismaamulka Washington, gee HHW-gaaga **Washington County Environmental Center**. Gudaha ismaamulka Ramsey, gee **goobta laga aruuriyo sannadka oo dhan**.

### □ Haraaga Cuntada

Bilow aruurinta haraaga cuntada. Waxaad ku aasi kartaa haraaga cuntada barxaddaada ama waxaad gain kartaa goobta la dhigo ee ismaamulka si loogu badalo carro nafaqo leh! Dadka deegaanka Ramsey, **halkaan guji** si aad u bilowdo. Dadka degen Ismaamulka Washington, **halkaan guji**.

Dib u soo saar





### □ Daboolka Ka Qaad

Ku baddal dabinkaaga kaluunka birta ah mid aan bir ahayn. Dabinka birta laga sameeyay wuxuu sumayn karaa shimbiraha, gorgorka iyo duurjoogta kale haddii ay laqaan. Haddii aadan hubin in dabinkaagu ka samaysan yahay bir (lead), isku day in aad dabinka ku xoqdo waraaq. Haddii ay xariiq ku sawirto, waxay u dhowdahay in ay bir tahay. Si bilaash ah kaga baddalo dabinkaaga kaluumaysiga [goobta aruurinta sannadka oo dhan ee Ismaamulka Ramsey](#) ama [Washington County Environmental Center](#).

### □ Ka hel Maktabaddaada Gudaha

Aqri buug ku saabsan dabeecadda – dhirta, xayawaanaadka, cimilada, muuqaalka dhulka! Aqri buug aad kala timid guriga ama mid kasoo amaaho si bilaash ah maktabaddaada dadweynaha. Bookho websaytka maktabaddaada si aad u bilowdo. Ka hel goobaha maktabadda Ismaamulka Ramsey [halkaan](#) iyo maktabadaha Ismaamulka Washington [halkaan](#).

### □ R&E Center Bookhashada Fogaan aragga ah

Ku samee bookhasho fogaan arag ah Xarunta Tamarta iyo Dib usoo celinta Ramsey/ Washington [halkaan](#). Dhamma an qashinka ay dadka deegaanka iyo ganacstada ismaamulada Ramsey iyo Washington ay geeyaan R&E Center ee ku taala Newport halkaas oo lagu hagaajiyo si qiimahooda loo soo celiyo. Diyaarinta qashnku waxay sidoo kale meesha ka saaraysaa in uu dhulka ka buuxsamo. Ma heli kartaa qolkaaga maamulka bookhashadaada?

### □ Qaylo, Qaylo, Qaylo!

Soo ogow mid kamid ah 24ka goobood ee gawaarida la dhigto ee gobolka ama ismaamulka ee daaraddaada! Ka hel macluumaad ku saabsan goobaha gawaarida la dhigto ee Ismaamulka Ramsey [halkaan](#) iyo goobaha gawaarida la dhigto ee Ismaamulka Washington [halkaan](#).

### □ Weelka Daawada Lagu rito

Nadiifi khaanaddaada daawada oo astur daawada aadan rabin iyo tan dhacday. Haku ridin qashinka hana ku daadin suuliga. Keen goobta qaadista ee bilaash ka ah ee [Ismaamulka Ramsey](#) ama [Ismaamulka Washington](#) waxaadna gacan ka gaysanaysaa ilaalinta deegaanka, adiga oo ka hortagaya danbiga, isticmaalka maandooriyaha, iyo sumowga aan kutalagalka ahayn.

